


Maxaa dhacaya haddii  
adeegga raadinta  
daryeelku uusan ku  
habboonayn qof?



1. Wac My Aged Care lambarka 1800 200 422 ama booqo myagedcare.gov.au si aad uga wada hadashid baahiyahaaga iyo inaad go'aamiso haddii aad u baahan tahay caawimaad.
2. Booqdo xarunta Services Australia ee kasta.
3. Sargaalka khaaska ah ee Daryeelka Waayeelka wuxuu bixiya adeegyo fool-ka-fool ah 70 xarumood oo ka tirsan Services Australia.
4. Booqdo website-ka Services Australia si aad u aragto halka ay ku yaallaan ama wac 1800 227 475.



## Kaalmooyinka kale iyo faahfaahinta xiriirkooda waa:

Care Connect -  
Nolasha, oo sahlan

1800 940 633

Taageerada Difaaca -  
OPAN

1800 700 600

Taageerada Daryeelayaasha  
- Carer Gateway

1800 422 737

Khadka Caawinta Qaranka  
ee Xusuusta La'aanta

1800 100 500

Adeegga raadinta daryeelka waxaa taageeraya maalgelin ka timaadda Shabkadda Caafimaadka Aasaasiga ah ee Koonfur-bari Melbourne iyada oo loo marayo barnaamijka PHN ee Dowladda Australia

Isaga oo wadajir ah, waxaan gaari  
karnaa meel fog daryeelka  
waayeelkeena ee bulshooyinka  
kala duwan



## Raadinta Daryeelka



Buuggan, AfriAus iLEAC waxay ku xidhaysaa adiga iyo Care Finder, Care connect, si ay kuugu caawiso helitaanka adeegyada daryeelka waayeelka ee aad u baahan tahay

Macluumaad Doorasho Maamulka Taageero



1800 940 633

Adeegyada Raadinta Daryeelka waxaa la bixiyo si bilaash ah maadaama ay si buuxda u maalgeliso Shabkadda Caafimaadka Aasaasiga ah

## Sida loo sameeyo tixraac?

1. Wac 1800 940 633 oo la hadal kooxda caawinta leh ee Care Connect.
2. Waxa ugu wanaagsan in qofku kuu joogo markaad wado. Waa in sidoo kale ay ogolaadaan inaad la wadaagto macluumadooda.
3. Kooxda ayaa markaas ku weydiin doonta su'aalo ku saabsan sababta qofka aad wacday magacaadiisa u baahan yahay caawimaad ka socota raadinta daryeelka.

**Waxaan Bixinaa Taageerada Ugu Wanaagsan ee Raadinta Daryeelka**



## Noocee caawimaad ah ayaa Raadinta Daryeelka bixisaa?

Barnaamijka Raadinta Daryeelka wuxuu bixiya adeegyo iyo taageerooyin kala duwan oo waxtar leh

**Taageero si aad u hesho My Aged Care (MAC)**

Ku jirta kaqeybgalka iyo bixinta taageero inta lagu jiro qiimeynta

**Hel adeeg bixiyeyaasha daryeelka waayeelka**

Taageero si aad u hesho adeegyada iyo taageerooyinka deegaanka

**Buuxi / dhammeystir foomamka**

Ku jirta heshiisyada adeegyada daryeelka waayeelka

**La soco adeegyada**

Hubi in wax walba ay sax yihiin

**Hel su'aalaha iyo jawaabaha**

Hel taageerooyinka bulshada

## Yaa ka heli kara caawimaad raadinta daryeelka?

Si aad u heshid adeegyadaas, qofku waa in uu:

- 1- Haysan qof taageero siin kara oo ka caawiya fahamka nidaamka daryeelka waayeelka.
- 2- Ugu yaraan 65 jir ama ka weyn (50 jir ama ka weyn dadka ATSI); ama
- 1.3- Ugu yaraan 50 jir oo dakhli hooseeya iyo guri la'aan, ama halis ku jira in uu guri la'aan noqdo (45 jir ama ka weyn dadka ATSI)

Intaa waxaa dheer, waa in aad leedahay mid ama ka badan sababahan u baahan taageero:

- 1- Dhibaato ka haysato isgaarsiinta sababo la xiriira luqadda ama akhriska iyo qorista oo aad u liidato.
- 2- Dhibaato ku haysato fahamka macluumaadka iyo go'aan qaadashada.
- 3- Ku xishood ama aan diyaar u ahayn inaad la xiriirto adeegyada daryeelka waayeelka ama hay'adaha dowladda.
- 4- Halis ku jirtaa ama xaalad aan ammaan ahayn haddii aanad helin adeegyada.
- 5- Ku aqoonsan tahay LGBTQI, si dhaqameed iyo luqadeed kala duwan,